

La kulanka Hay'adaha Dhaqangelinta Sharciga ama Xeer Ilaaliyayaasha

Liiska hubinta oo degdega ah oo loogu talagalay u doodida naftaada ee dhanka goobaha nidaamyada

- Waxaad wax ka weydiin kartaa fursadaha loogu talagalay goobaha kulanka. Goobta kulanku ma aha in ay mar walba noqoto saldhiga booliska ama xafiiska DA.
 - Maxay meel ammaan ahi kuula muuqataa?
 - Wax ma kula kulmi kartaa meel ganacsi oo guud, xarunta bulshada, ama gurigaaga?
 - Haddii kulanka shakhsi uusan ahayn mid badbaado leh, wax ka weydii kulanka dhanka internet-ka.
- Haddii aad leedahay Qof u dooda Qofka Dhibbanaha ah, waa in uu weydiiyaa wax ku saabsan baahiyaha dhanka gaadiidka. Haddii aysan ahayn, waxaad weydiin kartaa wax ku saabsan waxyaabaha sida:
 - Tigidhka bas raacida
 - Taxi
 - Lacago la isku soo celinayo oo loogu talagalay kharashaadka safarka
 - Kala doorashooyinka /caawimaada daryeelka carruurta
- Fadlan ogow Khadka Ka Jawaabida Eexda waxaa dhici karta in uu ka caawiyo kharashaadkani haddii Qof u dooda Qofka Dhibbanaha ah uusan karin.
- Maxay yihiin baahiyaha helitaanka ee kale ee aad qabto? Miyaa loo baahan yahay adeegyada turjumaada luqadda?
- Yaad rabtaa in uu kuula joogo qof wax taageera ahaan?
- Weydii cidda kale ee goobjoog ka noqon doonta kulanka/dhageysiga.
- Ma rabtaa in aad qof u xilsarto in uu noqdo barta xiriirka muhiimka ah oo loogu talagalay sii dabagalka?
- Maxay yihiin su'aalaha aad u hayso iyaga? Samee liis oo qaado waqtigaaga adiga oo isha marinaya.

- Waxaad soo qaadan kartaa qalin iyo warqad si aad u qorto jawaabaha ama su'aalaha.
- Wax ka weydii aqoontooda ay u leeyihiin dembiyada nacaybka iyo dhacdooyinka eexda.
- Weydii haddii kulanka la duubi doono iyo in kale. U sheeg heerkaaga dhanka kalsoonida ee la xiriirta tani.
- Maxay tahay xuquuqda dastuuriga iyo sharciga ah ee dhibbanaha ee aad heli karto?
- Wax ka weydii sida waxyaabaha kuu gaarka loo ilaalin doono.
- Haddii aad leedahay dhacdooyin dheeraad ah oo dhaca, wax ka weydii sida aad u soo sheegi karto iyaga.
- Codso macluumaadkooda lagala soo xiriirayo iyo lambarrada kiiska haddii aad u baahan tahay in aad mar labaad la xiriirto iyaga.